



Macluumaadka cusub ee ciyaaraha: Ciyaartooyda PIL oo ku guuleystay horyaalada ciyaaraha fudud, golf-ka

Ciyaartoy ka socota Naadiga Dugsiyada Ka Dhxeeeya ee Portland ayaa toddobaadkii la soo dhaafay ku guuleystay horyaalada gobolka ee Class 6A ciyaaraha fudud iyo golf-ka, oo uu hoggaaminayay ardayga ciyaartoya ah oo sanadkii labaad dhigta Dugsiga Dhexe Benson oo qaaday laba horyaal isaga oo soo bandhigay ciyaar heerkeedu sareeyo.

Ciyaaraha fudud ee wiilasha: Micah Williams oo ka socday Benson ayaa muujiyay sababta loogu tixgelinayo in uu yahay mid ka mid ah xiddigaha soo kacaya ee gobolka isaga oo aan kaliya ku guuleysan horyaalada orodka degdega ee 100- iyo 200-mitir, balse jebiyay rikoorkii tartanka ee labada orodba u yaalay ee Sabtidii ka dhacay Garoonka Hayward ee ku yaala Eugene.

Williams wuxuu ku guuleystay orodka 100 waqtii dhan 10.42 7 ilbiriqsi isaga oo ciyaartoya kaalinta labaad galay kaga guuleystay 0.24 ilbiriqsi. Williams wuxuu jebiyay rikoorkii tartanka u yaalay oo ahaa 10.48, ee uu 2011 dhigay ciyaartoya Thomas Tyner oo ka tirsanaa Aloha. Williams kadibna wuxuu qaatay orodka 200 waqtii dhan 21.19 ilbiriqsi, isaga oo ku guuleystay waqtii dhan 0.38 isla markaana jebiyay rikoorkii tartanka u yaalay oo ahaa 21.20, ee uu 2011 dhigay ciyaartooya Jack Galpin oo ka tirsanaa Crater.

Laba ka tirsan ciyaartooyda PIL ee orodka dheer ayaa ku guuleystay tartanka orodkiisu ugu dheeraa. Jimcihi, ardayga ciyaartoya ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Franklin ee Will Eaton ayaa ku guuleystay horyaalkiisa ugu horreeyay ee gobolka isaga oo ku guuleystay orodkii 3,000 mitir waqtii dhan 8 daqiiqo, 31.83 ilbiriqsi. Ardayga ciyaartoya ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Wilson ee Alex Slenning, oo ahaa horyaalka gobolka ee orodka dheer, ayaa kaalinta labaad galay isaga oo keenay waqtii dhan 8:32.42.

Slenning ayaa bog cusub furay Sabtidii, isaga oo ku guuleystay orodkii 1,500 waqtii dhan 3:55.96, isaga oo waxoogaa ka horreeyay Eaton, oo kaalinta labaad galay isaga oo keenay waqtii dhan 3:56.27.

Ardayga ciyaartoya ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Lincoln ee Sawyer Christopher ayaa ku guuleystay horyaalkiisii labaad ee isku xiga ee qori tuurka 'javelin'. Calaamaddiisa qori tuurka ee uu helay isku daygiisii koowaad, 199-8, ayuu xajistay taasi oo noqotay tuuristii guusha keentay. Sanadkii la soo dhaafay, tuuristii guusha keentay ee Christopher waxay ahayd 189-11.

Dadaalka Williams ayaa ka caawisay Benson in ay noqoto kooxda soo gelaysa PIL ee sare ee dhibcaha kooxaha. Techmen waxay gashay kaalinta lixaad iyada oo keentay 27 dhibcood; West Salem ayaa ku guuleysatay horyaalka iyada oo keentay 60 dhibcood.

Ciyaaraha fudud ee gabdhaha: Ardayada ciyaartoya ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Grant ee Judith Baxter Game ayaa ku guuleystay horyaalka sanadkii labaad ee isku xigta, iyada oo xilligan keentay waqtigeedii ugu wanaagsaa ee boodada saddexda jeer la boodo ‘triple jump’.

Sabtidii, Baxter Game waxay markii u horeysay ku guuleysatay boodada saddexda jeer la boodo ‘triple jump’ iyada oo afarta jeer ee ay isku daydayba ay noqon lahaayeen calaamadda guusha keenta. Isku daygeedii labaad, Baxter Game waxay booday 38 feet, 5½ inches, si ay ugu guuleysato horyaalka (calaamaddii u wanaagsanay ee qofka kaalinta labaad galay waxay ahayd 37-3). Isku daygeedii u dambeeyay, Baxter Game waxay dhigtay, xill-xiyaareedkii u wanaagsanaa gobolka oo dhan, iyada oo booday 39-7¾.

Lincoln waxay ku jirtay halka u sarreysa ee PIL ee tartanka. Cardinals, oo ka dambaysay kaalinta saddexaad ayaa dhammeystay orodka 1,500 iyo 3,000 labadoodaba taasi oo ay soo raacday Kyla Becker, oo gashay kaalinta shanaad iyada oo keentay 34.6 dhibcood. Jesuit ayaa ku guuleysatay horyaalka iyada oo keentay 92 dhibcood.

Golf-ka wiilasha. Ardayga ciyaartoya ah ee sanadkii saddexaad dhigta Lincoln ee Nate Stember, ayaa noqday wiilkii 10^{-aad} ee qaada horyaalka golf-ka ee ka socda PIL, iyo kii saddexaad oo ka socda Lincoln, isaga oo ku guuleystay tartanka Class 6A isaga oo keenay afar ku dhufasho ‘shots’ oo dheeraad ah ciyaartii ka dhacday Naadiga Golf-ka ee Emerald Valley Emerald Valley oo ku taala Creswell. Stember ayaa ku soo biiray Peter Jacobsen (1972) iyo Adam Bean (2011) oo ahaa ku guuleystayaasha gobolka ee Lincoln. Bean wuxuu ahaa ciyaaryahankii ugu dambeeyay golf-ka ee PIL ee ku guuleysta horyaalka wiilasha.

Stember wuxuu ku dhuftay qiyaas wanaagsan oo 1- buundo ka yar- dhibcihiisa la iska rabay oo ahaa 71 ee wareega koowaad si uu hoggaaminta ciyaarta ula wadaago ardayga ciyaartoya ah oo sanadkii labaad dhigta ee Jesuit ee Andrew Reinhardt. Stember wuxuu saddex jeer keenay ‘three birdies’ qiyaas wanaagsan oo dhan hal ka hoos maray dhibcihiisa la rabay isaga oo laba jeer oo ah qiyaas wanaagsanayn ‘two bogeys’ ka kor maray dhibcihiisa la rabay kaasi oo ahaa wareegii koowaad.

Wuxuu wareegii labaad ku bilaabay kaalinta 10^{-aad}, wuxuu keenay qiyaas laba dhibcood ka badan dhibcihiisa la rabay oo ahaa 4 godkiisii koowaad, ka dib intii aanu soo rogaal celin iyada oo shan jeer ka harsan tahay oo aanu keenin qiyaas wanaagsan oo dhan hal kar mar ka hoos maray dhibcihiisa la rabay isaga oo afar jeer ka kor maray dhibcihiisa la rabay oo ah dhibco dhan 73 taasi oo ka dhigtay in qof isku kaalin galaan wareega hoose oo dhacay maalin hawo badan jirtay. Isugeyntiisa labada maalmood uu keenay waxay ka dhigtay in uu noqdo 144 ciyaaryahankii golf-ka kali ahaa ee aan ka kor ee aanan dhammeysan ee aan ka kor marin dhibcihiisa la iska rabay.

-Mike Tokito